

Xeerka Anshaxa Ardayda

Kulliyadda farsamada ee Emily Griffith waxaa dooneysa inay hergeliso deegaan dugsi oo amaan ah, ku haboon waxbarasho, aan lahayn carqalad aan loo baahneyn. Dhaqan halis ku ah daryeelka iyo nabadgelyada ardeyda kale ama shaqaalaha iskoolka, kaasi oo carqaladeeya awoodda iskoolku ku siin karo fursado waxbarasho ardayda kale waxaa loo qaadan doonaa wax aan habooneyn. Siyaasadahan waxaa loo dejiyey si ay u siiyaan jawi waxbarasho oo heer sare ah cid weliba.

Dhamaan ardayda waxaa looga baahan yahay in ay raacaan Xeerka Anshaxa Ardayga mar walba. Dhamaan ardayda ayaa masuul ka ah in ay bartaan Xeerka Anshaxa Ardayga ayna fahmaan waxa keenaaya xadgudub. Ardayda lagu helo inay ku xadgudbaan Xeerka Akhlaaqda Ardayga waa laga saari doonaa fasalka illaa waqti ay macalinka iyo kormeeraha maamuluhu go'aamiyaan talaabo edbinta ku haboon. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay cabasho ka keena talaabo kasta oo edbin ah oo ka dhalatay jebinta Xeerka Anshaxa. Fadlan Akhri Xeerka Cavashada si aad u fahanto hanaankaan.

Xadgudubyada soo socda waxay keenayaan talaabo edbin ku habboon oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku koobnayn: ka saarista dugsiga, soo laabasho shardi ku xiran yahay, ama ka cayrinta degdega ah:

- Haysashada hubka, rasaasta, qalabka qarxa, ama hub sharci-darro ah sida lagu qeexay sharciga Colorado.
- La dagaallanka, weerarka, hanjabaad waxyeelada jirka, ama dhibaateyn galmo.
- Samaynta aflagaado, cabsi gelin, ama dhibaateynta macallimiinta, ardayda, ama shaqaalaha ayna ku jirto fawdada ama carqaladaynta waxbarista, cilmi baarista, maamulka, talaabooyinka edbinta ah ama shaqooyinka kale ee Kuleejka.
- U hogaasamid la'aanta qawaaniinta afka ama qoraalka ah ee shaqaalaha Kuleejka iyo/ama shakhsiyaadka ku jira maamulka.
- Ku hawlanaanta qaybinta, haysashada, isticmaalka, ama khamreysnaan, xashiishka, daroogada sharci darrada ah ama walxaha la kantaroolo sida ku qeexan qodobka 12-22-303, Xeerarka Cusub ee Colorado.
- Ka qaybgalka hawlaha burcad la xiriira iyo sifooyinka burcadnimo sida midabada, calaamadaha gacanta, qoraalka, dharka, dahabka, buugaagta, sumadaha, iyo sifooyinka kale ee la xiriira burcanimo.
- Burburinta, jabinta, ama xatooyada hantida dugsiga ama hantida dadka kale.
- Inaad noqotid mid aan daacad ahayn, khiyaamo, qaadasho qofkale waxiisa, ama si ula kac ah u bixiya macluumaad been ah.
- Foojareynta, beddelka, ama si xun u isticmaalka dukumiintiyada dugsiga, diwaanada, qalabka aqoonsiga, qalabka waxbarashada, iyo helitaanka internetka.
- Isticmaalidda luuqada ama ereyada aan wanaagsaneyn.
- Khamaartanka, isweydaarsiga, ama khamaartan nooc kasta, ha ahaato ama ku saabsan dhismooyinka.
- Ka qayb galka gelitaanka aan la fasaxin ama isticmaalka qalabka dugsiga iyo / ama alaabta.
- Ku hawlanaanta qaybinta aan la oggolayn ama iibinta alaabta ama qoraalada aan la fasaxin ee lagu qoro boorarka dugsiga ama dhismooyinka korkooda.
- U hogaansamid la'aanta waajibaadyada qandaraas ee Kuleejka Farsamada Emily Griffith (ayna ku jirto laakiin aan ku koobnayn lacagaha waxbarashada, shuruudaha barashada shaqada ama shaqaaleynta).
- Ku howlanaanta isticmaalka aan la aqbali karin ee qalabka dugsiga iyo agabka khayraadka.
- Cabiska sigaarka tubaakada ama marijuana, ama adeegsiga sigaarka elektarooniga ah ama shiishada, lagu cabo wax kamid ah dhismeyaasha, dukaannada Kuleejka Farsamada ee Emily Griffith, ama dhulka Kuleejka Farsamada ee Emily .
- Isticmaalka cunto ama cabitaan la keeno ama lagu cuno fasalka iyada oo uu ogolaan macalinka.
- Ku baakimid wax gaari laba lugoodle ah xarunta dhexdeeda.
- Keenista caruurta fasalka ama ka tagitaan caruurta aan lala joogin ama aan lagula kormeernin hantida dugsiga.
- Keenidda xayawaanka ama xayawaanka rabada nooc kasta dhismaha dhexdiisa (Ka reebban: xayawaanka adeegga).
- Ku martiqaadida saaxiibbadaa xarunta iyo/ama inaad keento si ay fasalka kuula joogaan.
- Adeegsiga sameecadaha dhagaha, taleefannada gacanta, waraaqaha, ama aalad kale oo elektaroonig ah oo lamid ah inta lagu jiro casharka.
- Soo bandhigid nooc kasta oo dhar ah oo looga gol leeyahay in ay carqaladeeyaan geeddi-socodka waxbarashada oo ay ku jiraan xidhashada dhar gaaban, xadhig, ama dhar kale oo jidhka soo bandhigaya.
- Jebinta Sharciyada Federaalka, Gobalka ama Maxaliga ah iyo sidoo kale jebinta xeerarka kale ee anshaxa sida ku cad Xeerka Anshaxa iyo Eedaabta Ardayga ee Denver Public Schools ama xeerarka kale ee ku haboon ee lagu sameeyay fasallada ama barnaamijyada gaarka ah.